Qodobo khuseeya dib u noqos

Adiga qalbiga ku haya inaad wadankaaga hooyo ku noqoto, ayaa waxaa hubaala inaad qalbiga ku hayso su´aalo badan oo aad iswey-diinayso. Haddaba waxaa ay waaxda soc-daalku (migrationsverket) rajaynaysaa inay qodobadaani kaa caawin karaan inaad gaarto, go´aan adag. Qodobadaan waxaa hubaal ah inaad ku kaamili karto, fikrado ama qodobo adiga kuu gaar ah. Hadaba waxaan kuu ban-naynay meelo gaar ah oo aad ku qori karto dhamaystirkaaga.

Waxaa muhiim ah inaad ka fekerto arrimahaan soo socda:

… xaga caafimaadka

❑ Sida daryeelka caafimaadku u shaqeeyo dalka aad u guurayso

❑ Daawada muhiimka kuu ah iyo inaad iswe diiso inaad xaga ka gadan karto

❑ In la heli karo caawimaada qalabka naafada

❑ Talaalka aad u baahan tahay intaada bixin

❑ Warqadahaaga dhakhtarka ee aad u baahan karto (iyo haddii loo baahdo turjumid)

❑ .....
.....

… xaga shaqada

❑ Ka raadso tababar xirfadeed shirkadaha iswidan, si aad u saa´idsato aqoon ku waja han waxa aad rabto inaad wadankaas ka qbato. (waxaa laga dalban karaa xafiiska shaqada)

❑ Mashruuca ku wajahan dib u noqoshada, waxuu si wanaagsan kuugu caawinayaa hal kaas.□ Shahaadooyinka ama cadaymaha aqoonta ee aad u baahan karto mustaqbalka. (iyo haddii loo baahdo turjumid)

❑ Xiriirada qiimaha kuu leh ee aad u baahan karto Iswiidhan, tusaale, shaqo iyo iskoolka.

❑ Warqadda cadaynta shaqadda ee shaqo bixiyaha wadankaad u guurayso.

❑ .....
.....

… Iskoolka

❑ La xiriir hay´adaha maamulka wadankaas si aad u hesho warbixin ku saabsan iskoolada.

❑ Dhamaystiro shahaadooyinkaaga aad u baahan karto si aad waxbarashadaada uga sii wadato wadanka aad u guurayso.

❑ Waa inaad haysataa shahaadooyinka iswidishka baasitaan ama wax u dhigma

❑ Turjumo cadaymaha xirfadda iyo shahaadooyinka iskoolada ama koorsooy inka Iswiidhan

❑ .....
.....

… xaga amaanka

❑ U foojignoow sharciyada ku saameeynaya tusaale, (haddii aad u baahato inaad xiriir la yeelato safaarada qaabilsan wadankaas)

❑ La soco xaqa aad leedahay iyo waajibaadka ku saaran ee wadankaad u guurayso.

972 018 Faktablad om stödpunkter vid frivillig återvandring.
Somalisk översättning. Produktion: Stuc. Senast uppdaterat: december 2010

Migrationsverket

❑ La soco meelaha dagaaladu ka dhaceen haday jiraan, oo dhici karta inay miinooyin ku aasnaan karaan.

❑ Iska soo horjeed jinsiyadeed, haday sidaas jirto.

❑.....
. .....

… xaga gurigyaha ee Iswiidhan

❑ Iska ogoow sidaad guriga u fasaxi lahayd, fasaxna intaadan guurin.

❑ Ogeysii guuritaankaaga xafiiska canshuuraha ee agtaada ah (skattemyndiheter), oo dalbo foomka la buuxiyo ee la yiraahdo ”flytten till utladet”

❑ Ka bedel cinwaankaaga Boostada.

❑ Xir taleefoonkaaga, iskana jooji ay haddii jiro joornaal kuu soo dhaca ee lacag ah Iwm.

❑ .....
.....

… xaalada guryaha ee wadankaad u guureeyso

❑ Xaalada guryaha ee wadankaas.

❑ Warqadda lahaanshaha guriga (sabarloogada)ee aad u guurayso iyo haddii aad u baahan tahay caawimaad xaga sharciga ah.

❑ Dayactirka abartamintada (lägenhet) amaba guriga.

❑ Ogeysii cinwaankaaga cusub dadka muhiimka kuu ah.

❑ .....
.....

… xaga dhaqaalaha ee Iswiidhan

❑ Baar sharciyada ku wajahan caymiska wadankan ee xaga, hawlgabka, dhaqaalaha jiradda, lacagta carruurta la siiyo iyo sida la yeelaya hadaadan dhalashada haysan.

❑ La xiriir CSN-ta, haddii aad qabto daynta lacagta dhigashada alaabta guriga ama waxbarashada.

❑ Bixi daymaha ama heshiis la gal kuwa kugu leh, si aad u qeyb qeyb isaga bixiso, intaa dan bixin.

❑ Ka dalbo deeq dhaqaale degmada aad degen tahay.

❑ Ka dalbo waaxda socdaalka (migrationsverket) deeq aad ku aadid wa dankaaga, tel 0771-235 235.

❑ .....
.....

… dhaqaalaha wadankaag yu guurayso

❑ Sida caymiska wadankaasu u shaqeeyo, tusaale ahaan, xaga hawlgabka iyo deeqya da dawladaasu bixiso Iwm.

❑ Sida waxbarashadu u shaqeeyso, tusaale: hadday lacag la´aan aad ku dhiganayso. Iyo haddii lagu siinayo lacag dayn ah ama deeq ah.

❑ Taageerooyinka dhaqaale ee ku wajahan, xaga guryaha ama bilaabida shirkadaha.

❑ Ururada bulshada ee wadankaas xataa waa ay ku caawin karaan.

❑ .....
.....

… xaga safarka

❑ Qorshee safarkaaga iyo sidii alaabta laguugu qaadi lahaa waqti fiican intaadan safrin.

❑ Sameeyso caymiska muhiimka kuu ah mar kaad safrayso.

❑ Habayso dukumentiga aad u baahan tahay inaad qaadato, tusaale: baasaboor, sugnaan, warqadda aqoonsiga, laysanka baabuurka, warqad sharxaysa waxbarshadii iyo shaqooyinkii aad soo qabatay (CV), warqadda qeexitaanka dhaqaale ee sanadlaha ah (deklarstionen), iyo warqadaha kastanka, Iwm.

❑ .....
.....

Kala hadal qoyskaaga si furan sida aad u qors-heynayso dib u noqoshadaada iyo waxa qof walba sugaya. Waxaa si gaar ah muhiim u ah inaad carruurta kala hadasho arrintaas iyadda ah. Waxa laga yaabaa inay halkan ku koreen oo ay u baahan yihiin in la fahamsiiyo.Aad ayey muhiim u tahay inaad u diyaariso familkaaga iyo dadka qaraabada ah ee jooga wadanka aad ku laabanayso, inay ogaadaan in-aad soo guurayso. Xiriirka aad samayso intaada laaban aad bay muhiim ugu tahay guuridaada.Ka sheekeysta waxa ay sababi karto guuri-daani, haddii aysan suuroobi karin inaad soo laabataan, haddii xaga kugu xumaato.

Warbixintaan waxaa si wada jir ah u soo saaray. Waaxda socdaalka, Bisha cas, Sociala missionen, Caritas Sverige, Magaalad Stockholm, Xafiiska dib u noqoshada iyo Svenska kommun-förbundet.